Carar!

W/Q: Trevor Noah [Af Ingiriisi][1]
W/T: Cabdicasiis Guudcadde [Af Soomaali]

Marmarka qaar, filimaanta Hollywood ee khatarta ah waxa ku jira baabuur soconaya oo uu qof ka boodayo ama laga tuurayaba. Qofku dhulkuu taabanayaa, wuu yara galgalanayaa xoogay. Dabadeed intuu qummaati u sarajoogsado, ayuu boodhka iska biinayaa sidii oo aanay waxba dhicin. Waxaas oo kale markaan arko waan la yaabi jiray: *waa huuhaa. Qof baabuur soconaya ka dhacay waxa soo gaadha khasaare intaa ka badan.*

Haddaba, sagaal jir baan ahaa markii aniga qudhayda baabuur soconaya ay Hooyaday iga tuurtay! Axad bay ahayd. In ay Axad ahayn waxaan ku garanayaa markaas uun baannu xagga kiniisadda ka nimi, oo carruurnimadaydii Axaduhu waxay ku suntanaayeen kiniisad. Weligayo maannaan seegin kiniisadda. Hooyaday waxay ahayd—ilaa haddana ay tahay—haweenay aad ehlu diin u ah. Sida ku dhacday dadkii dhaladka ahaa ee Afrikaba, dadka reer Koonfur Afrika waxay qaateen diintii guumaystaha. Markaan leeyahay 'qaateen' waxaan ka wadaa 'waa la nagu qasbay'. Ninka cadi dadka dhaladka ah wuxuu tusi jiray saaxiibnimo been ah. "Ciise Masiix in aad baridaan baad u baahan tihiin," ayuu odhan jiray. "Ciise wuu idin badbaadin doonaa." Dadka dhaladka ah jawaabtooduna waxay iska ahayd: "Waa run oo, horta waannu u baahannahay cid na badbaadisa—oo idinka naga badbaadisa, laakiin waa waxaan la helayn. Markaa aynu bal Ciisahan la sheegayo ka soo jibbakeenno!"

Qoyskayga oo dhami waa ehlu diin, balse halka ay Hooyaday ka taabacsanayd Ciise, ayeeyday waxay isu dheellitirtay Kiristaannimadeeda iyo caqiidadii Xawsaha ee ay ku soo ababtay, iyadoo siyaaran jirtay ruuxda awoowayaashayo. Muddo dheer ayaanan fahmi jiray sababta madaw badani caqiidadoodii dhaladka ahayd uga guureen ee ay Kiristaannimada u doorbideen. Laakiin mar kasta oo aanu kiniisadda aadno, iyo mar kasta oo uu bato xilliga aan ku qaato kuraasida kiniisaddu, waa mar kasta oo aan soo fahmayey diinta Kiristanka iyo sida ay u shaqayso: haddii aad tahay Maraykanka dhaladka ah oo aad yeyda barido, waxaad tahay cawaan. Haddii aad Afrikaan tahay, oo aad ruuxda awoowayaashaa barido, waxaad tahay qof danbeeya. Balse marka dadka cadi ay baryayaan nin biyaha khamri ka dhigayaa, dee waa iska caadi!

Carruurnimadaydiiba kiniisad baa qabtay. Ugu yaraan afar cisho ayaannu toddobaadka ka tegi jirnay. Habeenka Salaasada waa la ducaysan jiray. Habeenka Arbacada baybalkaa la dhigan jiray. Habeenka Khamiista wuxuu ahaa habeenka dhallinyarada ee kiniisadda. Jimcaha iyo Sabtida ayaannu fasax ahayn (malaha waxaannu fasax u ahayn in aannu soo

[1] Meesha laga soo turjumay: Noah, Trevor (2016), *Born A Crime: Stories from a South African Childhood.* Spriegel and Grau, NY. Cutubka 1aad oo cinwaankiisa af Ingiriisida ahi yahay: "RUN!"

yara denbaabno!) Axaddana kiniisaddaannu aadi jirnay. Markaa saddex kiniisadood ayay toddobaadkii noo ahayd, markaan soo koobo. Sababta aannu saddex kiniisadood u tegi jirnay waxa lahayd Hooyaday, oo odhan jirtay kiniisad kastaa wax bay gaar iila tahay. Kiniisadda kowaad waxay gaar la tahay ammaan wareer ah oo lagula dul dhaco Rabbiga. Kiniisadda labaadna tafsiir qotodheer baa lagu bixin jiray, oo Hooyaday ay jeclayd. Kiniisadda saddexaadna waxay hodan ku ahayd gacaltooyo iyo laxaw; waxay ahayd goob aad si dhab ah ugu dareemaysid Ruuxda Qudduuska ah. Intii aannu u kala gooshaynay kiniisadahaa, waxaan dareemay in ay xag isir aad ugu kala soocan yihiin: kiniisadda ammaantu waxay ahayd kiniisad la isku dhafan yahay, kiniisadda tafsiirku waxay ahayd kiniisad caddaan, halka midda gacalada lihina ay ahayd kiniisad madaw.

Kiniisadda iskudhafka ahi waxay ahayd kiniisadda Rhema Bible. Rhema waxay ka mid ahayd kiniisadaha ugu waaweyn, uguna casrisan, ee nawaaxiga ka dhow. Baaddariga haysta, Ray McCauley, wuxuu ahaan jiray dadka jidhkooda dhisa, aad buuna u dhoolacaddayn jiray, wuxuuna lahaa shakhsiyad hoggaamineed oo raynrayni ku dheehan tahay. Baaddari Ray wuxuu ka qaybgalay tartankii jidh-dhiska ee 1974, ee heer caalami, waxaanu galay kaalinta saddexaad. Qofka kaalinta kowaad maalintaa galayna wuxuu ahaa jilaaga caanka ah ee Arnold Schwarzenegger. Toddobaad kasta, baaddarigu intuu masraxa soo istaago, ayuu aad iyo aad isugu taxallujin jiray sidii uu Ciise uga bixin lahaa sawir qurxoon. Fadhiga hoolku wuxuu ahaa mid heersare ah, oo ay gilgilaan naadi ku luuqaynaya qasiidooyinkii ugu danbeeyay. Qof kastaa wuu heesayay, haddii aanad erayada hayninna dhib ma leh, oo meel yaroo hortaada ah ayay ku qoran yihiinba. Subcis Kiristaameed uun buu ahaa. Aad baan uga heli jiray kiniisadda iskudhafka.

Waxa timi kiniisadda caddaanka. Waxay ahayd kiniisadda Rosebank Union ee ku taal Sandton, oo ah qayb aad u cad oo aad u qani ah oo ka tirsan magaalada Joohaanisbeeg. Waan *jeclaa* kiniisadda caddaanka, waayo cibaado sidaas ahi ka may socon jiray, oo safka hore in aan galo ku maan qasbanayn. Safkaa hore Hooyaa tegi jirtay, aniguna qaybta dhallaanka, ee dugsiga Axadda. Dugsigaa waxa na loogu akhriyi jiray sheekooyin iska xaraabaad ah: Nebi Nuux iyo daadku waxay noo ahayd sheekada loogu jecel yahay; anigana si gaar ah bayba iigu socotay. Sida oo kale waxaan u riyaaqi jiray sheekada Nebi Muuse iyo markuu Badda Cas kala dhanbalayo, Nebi Daawuud oo Jaaluud ugu tuuraya, Ciise oo macbadka ku ag shaabuugaynaya lacag-sarrifayaasha.

Waxaan ku soo kacaamay guri uu dhif iyo naadir ku yahay dhaqanka shaacsani [pop culture]. Koox faneedda Boyz II Men xataa laga ma oggolayn in laga shido guriga Hooyo. Ma heeso ku saabsan wiil gabadh ilaa caawa xoodaaminaya? Maya, maya. Waxaasi mamnuuc bay ahaayeen. Ciyaalka iskuulka uun baan ku arkaa iyagoo wada qaadaya heesta “End of the Road”, aniguna halkan baan indhaha wareejinayaa oo waxan ay qaadayaan fekradba ka ma haysto. Igu maqaalay ahayd kooxdan Boyz II Men, balse waxba kala ma socon cidda ay ahaayeen. Muusigga keli ah ee aan aqaannay wuxuu ahaa

ka kiniisadda: qasiidooyin cod dheer, oo dhegaha kaa gelaya, oo Ciise ammaanaya. Waxaan sidaas oo kale ka ahaa filimaanta. Hooyaday ila may jeclayn in ay maskaxdayda wasakheeyaan filimaan ay ka buuxaan galmo iyo dagaal. Markaa, baybalkaa filin iigu filnaa. Qaaddi Samson[2] wuxuu ii ahaa aktarkayga. Halyey. Ma ninka kumannaanka qof ku dilaya lafta gadhka ee uu daanyeerka ka soo fujistay?! Waa wiil hoog! Waxa kuugu xiga baaddari Paul oo dhanbaallo u qoraya qolyihii reer Euphesus, dabadeed sheekadu dabafuran bay iska noqonaysaa. Waxa kuu yimi Axdiga Qaddiimka ah iyo Injiillada? Dhakadaan ka hayey eraygaad uga baahato bogaggaa, jusaskaa iyo aayadahaaba. Markaa, waxay noo ahayd ciyaar iyo halxidhaale baybal, dabadeed cid kasta waddaan marin jiray.

Waa tan kiniisaddii madawguna. Waxa cibaado iyo camal ka dhex socda kiniisaddaaba waannu soo eegnay. Waxay iska ahayd mid debadda u furan, oo teendhadii baanashada ee kiniisadaha u eg. Badanaa waxaannu tegi jirnay kiniisadda ay ku xidhan tahay ayeeyo, oo ahayd iskuul gaboobay oo ku xidhan mad'habta *Methodism*-ka[3], oo ay isugu yimaaddaan shan boqol oo ayeeyo Afrikaan ah, oo ku lebbisan toobab cirood iyo caddaan ah, oo kala rogaya kitaabkooda baybalka, si samir ka muuqdana ugu gubanaya cadceedda arxanka daran ee Afrika. Kiniisadda madawgu aad bay u qallafsanayd, been waa la caayee. Marawaxad iyo hawa-qaboojiye ma leh. Erayadii qasiidada ee qornaa ma leh. Waqtigeeduna weligeed buu ahaa, oo saddex ilaa afar saacadood ugu yaraan ayaa lagu jirayaa. Taasna waan ku yar dawakhay, waayo kiniisadda caddaanku waxayba iska ahayd saacad keli ah—gal oo ka bax, waadna ku mahadsan tahay imaanshahaaga. Besba. Laakiin kiniisadda madawga halkaas baad yuururaysaa weligaa, waxaana kaa yaabinaya sababta waqtigu u gaabinayo. *Kaalay, ma suuraggal baa in waqtigu istaagaba? Haddii ay suure tahay, muxuu kiniisadda madawga ugu istaagayaa, ee uu kiniisadda caddaanka ugu istaagi waayay?* Markii danbe waxaan isku qanciyay in dadka madawga ah muddada loogu badiyay si ay Ciise waqti badan ula qaataan, maaddaama aannu in badan soo silcaynay. "Halkan waxaan u joogaa si aan u sii kaydsado barakada toddobaadkayga oo dhan," ayay Hooyaday i odhan jirtay. Mar kasta oo uu bato waqtiga aannu kiniisadda joognaa, ayay iyada la ahayd, waa mar kasta oo barakadayaduna biirto, sidii kaadh bakhtiyaanasiib ah.

Kiniisadda madawgu qodob xiiso leh bay lahayd. Haddii aan saddexda ama afarta saacadoodba dhammaysto, waxaan fursad u helayay in aan arko wadaadka oo diinsaaraya dad quruumo galeen. Dadka la durreeyay sidii qof waalan bay u biqlaynayeen, af labadiina way kala waaxayeen. Gacanyarayaasha wadaadka ayaa soo qaqabanayey, sida ilaalada naadiyada, oo dabadeed baaddariga soo hoos fadhiisinayay.

[2] Sida uu dhigayo Buugga Qaaliga ee Baybalka Cibrigu (juska 13aad iyo 16aad), garsoore Samson (oo micnihiisu yahay 'Ninkii Cadceedda') wuxuu ahaa qaaddigii ugu danbeeyay ee Yuhuudda u taliya intii aan la boqorayn aagga.

[3] Mad'habta *Methodism*, oo sidoo kale loo yaqaan *Wesleyanism*, waa xarako ka tirsan Baratastanka, oo ku abtirsata wadaadka reer Ingiriis ee John Wesley (1703-1791).

Markaasuu baaddarigu inta uu madaxa qabto, oo uu si daran hor iyo gadaal u ruxo, ku qaylinayaa: "Rooxaantan waxaan ku saarayaa magaca *Ciise*!" Baaddariyada qaar baa gacan kululaa. Balse waxay ka sinnaayeen in aanu midkoodna is dhiibayn ilaa quruumaha la naaro, kulankuna ku kala dareero. Qofka la cuudiyay wuu is tuurayaa. Waayo, haddii uu soo taagnaado, waxay ka dhigan tahay in belaayada durraysay ay awood weyn tahay, oo ay tahay in wadaadku hawsha intii hore ka sii badiyo. Bal maad difaac uga ciyaartid xulka qaranka, wadaadkaasi waa kii dhulka ku dhiga. Alla! Taasina waxay ahayd xaraabaad.

Subcis Kiristaameed, sheekooyinka wada cawaandadda ahaa, iyo shuyuukhda sida daran wax u diinsaaraysa—waxaas oo dhami waxay i jeclaysiin jireen kiniisadda. Qodobka aan ku necbaa se wuxuu ahaa masaafada ay ahayd in aannu jarno si aannu u gaadhno kiniisadda. Waxayba ahayd socdaal hawl miidhan. Waxaannu degganayn Eden Park, oo ah soone yar oo ku yaal duleedka Joohaanisbeeg. Saacad bay nagu qaadan jirtay in aannu gaadhno kiniisadda caddaanka, 45 daqiiqo oo kalana in aannu gaadhno deegaanka Soweto oo kiniisadda madawgu ku tiil. Haddii intaasi caadi iska noqoto, Axadaha qaar ayaannu dib ugu soo laaban jirnay kiniisadda caddaanka si aannu u soo gudanno cibaado khaas ah oo fiidadkii ahayd. Xilliga aan guriga nimaadno, hurdada i haysa culayskeeda, waan dumi jiray.

Axaddan iyada ah, ee baabuurka soconaya la iga tuuryeeyay, waxay iska ahayd Axad ku bilaabantay sidii Axadaha kale. Hooyaa i toosisay, boorash aan ku quraacdana ii samaysay. Qubaysi baan u kacay inta ay u lebbisayso walaalkay iga yaraa, Andrew, oo markaa 9 bilood jiray. Dabadeed jidcaddaha ayaannu u baxnay, laakiin markii aannu si kasta u diyaargarawnay, ee baabuurkayagii aannu is nidhi istaadha, wuuba dhaqaaqi waayay. Hooyaday waxay lahayd gaadhi gaboobay, oo diisdiisan, oo nooca Volkswagen Beetle ah, oo aan wax badan ugu joogin. Sababta aanu kharash sidaas ah ugu taagnayni waa in uu iska cilladoobi jiray. Ilaa maanta waan necbahay baabuurta mustacmalka ah. Malaha wax kasta oo noloshayda ka xumaaday waxaan u aanayn karaa baabuur muctacmal ah. Baabuurta muctacmalka ahi waa kuwa sababay in la i xabbiso mar aan dugsiga ka soo habsaamay. Baabuurta muctacmalka ahi waa kuwa nagu kellifay in aannu waddooyinka marba gaadhi na sii qaada u yar baaqno. Baabuur mustacmal ahi sidoo kale wuxuu ahaa sababtii hooyaday ku guursatay. Haddii aanu baabuurkaa Volkswagen-ka ahi xumaan lahayn, loo ma baahdeen nin makaanig ah oo hagaajiya, kaas oo nin u noqday hooyaday, dabadeed annagana masuul naga noqday, oo sannado iska dhan na iska kaaya jidh dili jiray, oo xataa hooyaday madaxa baaskoolad kaga qabtay—waxaas oo dhan baa igu sababay in aan iminka doorbido gaadhi cusub oo dammaanad leh.

Inta aan kiniisad-aadista jeclaa waxa ka darnayd inta aan dhibsan jiray socdaalka sagaalka saacadood ah, ee loo dhexaynayo kiniisadda iskudhafka, dabadeed loo gudbayo

kiniisadda caddaanka, oo la tegayo kiniisadda madawga, haddana la soo kala jiiraynayo oo lagu soo laabanayo kiniisadda caddaanka. Wax la qaadan karo may ahayn. In aad gaadhi gaar ah ku timaaddo ayaa dhib ahayd, saa waaba baabuur dadweyne oo waqtiga iyo mashaqaduba labalaab yihiin. Maalintaa markii baabuurka Volkswagen-ka ahi daarmi waayay, hoostaasaan kaga ducaysanayay: *fadlan dheh gurigaynu iska joogaynaa, fadlan dheh gurigaynu iska joogaynaa*. Ka dibna waxaan jalleecay ka-go'naanta ka muuqata hooyaday wejigeeda, iyo in aanay dacayda laalaadinayn, oo ka dhigan in maanta ay na sugayso maalin kadeed badan oo dheeri. "Ina mari," ayay tidhi. "Basaskaa caasiga ah baynu mid qabsan e."

Hooyaday inta ay ehlu diin ahayd in le'eg ayay ahayd qof mayal adag. Mar hadday go'aan qaadato, waa sidaa ay u qaadatay. Wax kale iska daaye, duruufaha qofka ku kellifa in uu go'aankiisa beddelo, sida gaadhi istaadhmi waayay, iyada waxayba ku sii shiidaalin jireen in ay teeda ku sii adkaysato.

"Waa Shayddaankii," ayay tidhi iyadoo u jeedda waxa baabuurka xumeeyay. "Shayddaanku ma rabo in aynu kiniisaddii aadno. Si aynu u khilaafno, markaa, waa in aynu bascaasi qabsannaa."

Mar kasta oo aan waajahayo mayal-adkaanta diimeed ee hooyaday, anigoo ixtiraamaya, waxaan isku deyi jiray in aan kala hor imaaddo ra'yi keeda lid ku ah.

"Ama dee," ayaan idhi, "Rabbi ayaa gartay *in aynaan* maanta kiniisadda tegin, oo baabuurkii taa darteed u cilladeeyay, si aynu maanta guriga u wada joogno oo waqti nasasho u wada qaadanno, waayo xataa Rabbi isagaa nastay."

"Alla! Shayddaankii baa kaa dhex hadlaya, Trevor."

"Maya, waayo dee Ciise Masiix ayaa arrimaha kala debberaya, mar hadduu isagu wado hawsha oo aynu innaguna isaga barinno, dee baabuurka wuu hagaajin lahaa, balse waa kaa hagaajin waayay, sidaa darteed…"

"Maya, Trevor! Mararka qaar ayuu Ciise caqabado ku hor dhigaa si uu kuugu eego in aad ka gudubtid iyo in kale. Sida shaqada oo kale. Markaa tani waa imtixaan."

"Haa, Hooyo! Laakiin dee armuu imtixaankuba yahay in la eego sida aynu u aqbalno waxa dhacay, gurigeenna iska joogno, oo Ciisana ku ammaanno xikmaddiisa."

"Waar, maya! Shayddaan baa kaa dhex hadlaya. Ee orod oo dharka iska soo beddel."

"Laakiin dee Hooyo!"

"Trevor! *San'qhela!*"

San'qhela waa eray micnayaal badan huwan. Wuxuu la ujeeddo noqdaa: "ha iga hor iman," "ha i yaryaraysan," iyo "carkee!" Waa amar iyo hanjabaad wada socda. Waana

wax caadi ka ah oo waalidka Xawsuhu ubadkooda ku dhahaan. Mar haddii aan eraygaa maqlo, waan iska ogaa in ka dhigan tahay in hadal danbaa hadhin, haddii aan hadalka sii wadana la ii yaabi doono.

Xilligaa waxaan ku jiray iskuul Kootali ah oo la odhan jiray Maryvale College. Sannad kasta waxaan horseed u noqon jiray ciyaaraha iskuulka, hooyadayna waxay sannad kasta ku guulaysan jirtay koobka hooyannimada. Maxaa wacay? Waayo iyadu waxay had iyo jeeraale ii eryan jirtay si ay gacan iigu soo dhigto, aniguna waxaan dhacdiyo baxdo uga ordi jiray si aanay ii qaban. Cidina lugo nagu ma gaadhayn aniga iyo hooyaday. May ahayn noocan yidhaahda "halkan kaalay waaryaa". Si bilaash ah ayay halkaaga kuugu imanaysaa. Sidoo kalana gacmaha ayay ka falnayd. Wax kastoo ag yaalla way kugu soo daynaysaa. Haddii waxaasi wax jabaya yahay, inta aan qabto ayaan dhulka dhigi jiray. Haddii se uu jabo, denbigaana anaa yeelan jiray, oo dhengadayntu way ka sii daraysaa. Haddii ay ubbo igu soo maguujiso, waa in aan qabtaa, dhulka dhigaa, dabadeed cagaha wax ka dayaa. Ilbidhiqsi ayaan go'aan ka gaadhi jiray *ma shay qiimo leh baa? Haa. Ma wax jabayaa? Haa. Haddaba qabo, dhulka ku hubso, dabadeed carar.*

Aniga iyo hooyaday waxa naga dhexeeyey xidhiidh aad ugu eg ka bisadda iyo jiirka (Tom & Jerry). Iyadu waxay ku adkayd tarbiyadaynta; aniguna dhega-adkaanta. Marmarka qaar ayay suuqa adeeg iiga diran jirtay, aniguna aanan guriga toos u iman jirin. Waxaan ku soo leexan jiray in aan baaqigii adeegga iiga soo hadhay soo siisto kaadhadhka ciyaarta. Aad baan ugu baasaa ciyaaraha fiidyawga (videogames). Waxaan xariif ku ahaa *Street Fighter*. Waxaan ka dhex bixi jiray ciyaar dhan. Shilin baan tuuran jiray, waqtiguna hillaac buu igu dhaafi jiray. Waxa ii xigi jiray in aan ku warhelo haweenay suun ila daba taagan. Waxay ka dhignayd in baratankii noo bilaabmayo. Irridda intaan isku maqiiqo ayaan qabsan jiray jidka dhasaystay ee Eden Park, anigoo fananaya gidaarrada, oo isa sii nabaya. Deriskayaga caadi bay u ahayd waxaasi. Cid kastaa way taqaannay: Inankaa yar ee Trevor in uu sidii fiidmeerta samada ka soo boodi doono, hooyadiina ku daba jirto. Kabaha cidhbaha dhaadheer xataa way ku ordi kartey, balse waxay awood layaab leh u lahayd in ay kabaha iska saarto iyadoo haddana xawaaraheedu aanu is dhimayn. Cidhbaha uun bay si yar u dhaqaajin jirtay, saa kabihiiba samaday ku sii maqan yihiin, haddana tallaabada ku xigta ma seegaysa. Markaa oo kale ayaan yaqiinsan jiray, *khalaas waa taa sidii dabaysha u dhabatay.*

Intii aan yaraa judhiiba way i soo qaban jirtay, balse markii aan weynaaday waan ka siiban jiray. Kolkii orodku ciilayna waxay la soo baxday ged kale. Mar alla marka ay aragto in aan ka sii libdhayo ayay ka toli jirtay, "*Joogso! Tuugga!*" Ilmaheeda ayay sidaa u geli jirtay. Koonfur Afrika cidina ma soo faragashato afaaraha dadka kale—marka laga reebo in arrintu taagan tahay tuug la soo qabanayo, markaas oo cid kastaa damacdo in ay wax ka geysato. Sidaa awgeed, markay ku muusannawdo "*Tuugga!*" waxa cagta cagta

ii saari jiray qofka qof iigu fog. Dabadeed waa in aan iska nabo, u gaso, oo aan ka fakado dhammaantood, aniga oo ku qaylinaya, "Waar tuug ma ihi! Inankeedii baan ahay!"

Axaddaa marna diyaar u ma ahayn in aan bascaasi cidhiidhi ah raaco, balse daqiiqaddii aan maqlay erayga *San'qhela* waan garan karayey in qaddarkaygii la ii sarjaray. Waxay soo qaadatay Andrew, baabuurkii Volkswagen-ka ahaana waannu iskaga nimi, oo bas in aannu raacno ayaannu u hollannay.

***

Waxaan ahaa shan jir, iska lix jir ah, markii Nelson Mandela xabsiga laga soo daayay. Waxaan xasuustaa in aan telefishannada ka arki jiray oo cid kastaa ay ku faraxsanayd. In kastoo aannu iska faraxsanayn, haddana maan aqoon sababta. Waan ka warhayey in uu jiro wax *midabtakoor* la dhaho iyo in uu gebagaboobayo iyo in taasi tahay arrin weyn, balse maan dhaaddanayn nuxurkeeda. Waxa aanan illaawi karin, ee aan xasuustaa, waa gacankahadalkii ku xigay. In dimuqraadiyaddu ka gacansarraysay midabtakoorka marmar baa loogu yeedhaa *Kacaan aanu dhiig ku daadan*. Taas waxa loogu yeedhaa maaddaama dhiigga caddaanka ee daatay uu iska yaraa. Balse dhiigga madawgu waddooyinkuu qulqulay.

Mar haddii midabtakoorkii dumay, waanu ogsoonayn in qofka madoobi talin doono. Su'aashu se waxay ahayd: qofkee madaw? Iskudhacyo ba'an ayaa dhex maray xisbiyadii Inkatha Freedom Party iyo African National Congress (ANC), oo talada isku hayey. Loollanka siyaasadeed ee labadan kooxood dhex marayey wuxuu ahaa mid aad u kakan, balse habka ugu fudud ee lagu fahmi karaa waa in uu ahaa dagaal abbaan [proxy war] reereed oo u dhexeeya Suluuga iyo Xawsaha. Xisbiga Inkatha wuxuu ahaa xisbi Suluu, aad u askariyaysan oo u qoomiyaysan. Halka xisbiga ANC uu ka ahaa mid guda ballaadhan oo cido badani ku jiraan balse hoggaamiyayaashooda xilligaasi ahaayeen reer Xawsa. Halkii ay nabadda ugu midoobi lahaayeen, iyagii baa isku soo jeestay oo ku kacay cawaannimo aan la malayn karin. Dibadbaxyo baaxad leh ayaa bilaabmay. Kumannaan qof ayaa la dilay. Waxa caan ahayd in dadka shaag ololaya luqunta iyo laabta loo geliyo oo sidaa lagu gubo naftana lagaga jaro. Reer Inkatha sidaas waxay ku sameeyeen reer ANC; reer ANC-na reer Inkatha. Maalin aan dugsiga u sii socday ayaan meyd sidaa loo gubay ku sii maray jidka. Fiidadkii ayaannu aniga iyo hooyo daaran jirnay shaashadda bilaa midabka ah si aannu wararka uga eegno: Dad ciiddaas ah baa la laayay. Konton qof baa la khaarajiyay. Boqol baa la dilay.

Eden Park ka may fogayn xaafadaha fidaya ee East Rand, Thokoza, iyo Katlebong, oo ahaa meelaha gelgelinta u ahaa iskudhacyada ugu arxanka daran ee dhex mara Inkatha iyo ANC. Ugu yaraan bishiiba mar ayaa aaggaba dab la qabadsiin jiray oo aannu ku warheli jirnay annaga oo baabuurka wadanna. Boqollaal dibadbaxyaal ah ayaa jidadka dhooban. Hooyo gaadhiga ayay qunyar uga duwi jirtay dadka isku ururs an iyo

shaagagga gubanaya ee waddada xannibaya. Wax taayirrada sidooda u gubtaa ma jiro—waxay sameeyaan uuro aynaan shaqo ku lahayn. Marka aannu shaagaggaa dhaafayno, waxaad moodaysey in aannu foorno ku jirno. Waxaan hooyo ku odhan jiray, "Waxaan u malaynayaa in Ibliisku naarta taayirro ku dhex gubi doono."

Mar alla marka dibadbaxyadu isla oogsadaan, xaafadahayaga albaabbadaa la wada xidhan jiray. Balse hooyo sidaa way ka duwanayd. Iyadu way u babbacdhici jirtay. Marka aannu dibadbaxyaasha dhaafayno indhaha ayay ku gubi jirtay sidii oo ay leedahay: *Waar ii banneeya, anigu qudhunkan dhacaya lug ku ma lihi e.* Xilliga ay ugu daran tahay iyada ka may qasnaynba. Arrintaasi yaalaa way i cajabgelin jirtay. Haddii xataa dagaal hortayada ka qarxo, iyadu ta u baxdaba ma aha: hawlaheeda ayay qabsan jirtay, oo meelaheeda ayay tegi jirtay. Isla mayal-adkaantaas ayaa keentay in aanay ka baaqan kiniisadda xataa haddii baabuurkii ka fadhiistay. Iyagoo shan boqol oo dibadbaxayaal ahi jidadka xoonsan yihiin, oo taayirro gubanina weheliyaan, hooyaday waa tii tidhaahda: "Waaryaa, is diyaari; shaqaan leeyahay, adiguna iskuul baad leedahay e."

"Haaye hooyo, maanad cabsanayn?" ayaan idhaahdaa. "Adigu waa keligaa, iyaguna waa ciiddaa iyo camaarkaas e."
"Hooyo qaali, keligay ma ihi," ayay iigu jawaabtaa. "Waxaan garab ka helayaa malagyada jannada oo dhan."
"Way fiicnaan lahayd haddii aynu [malagyadaa] *arki karno,*" ayaan u celiyaa. "Waayo u ma malaynayo in dibadbaxayaashu ka warhayaan in malagyo ay ina weheliyaan."

Waxay ii sheegtaa in aanan werwerin. Waxayna badanka ku soo celcelisaa odhaah ay ku noolayd: "Haddii Eebbe ila jiro, yaa i loodin kara?" Baqdin way ka dheerayd. Xataa marka ay tahay in ay baqato.

***

Axaddan aannu bilaa baabuurka noqonnay waxaannu soo dhammaysannay meertadii kiniisadaha, oo waxaannu ku danbaynay, sidii caadada ahayd, kiniisaddii caddaanka. Markii aannu u soo lugaynay Rosebank Union, arladuba gudcur magangooyo ah ayay ahayd, annaguna keli baannu ahayn. Giddi maantana waxaannu bascaasiba bascaasi uga beddelanaynay kiniisadba kiniisad; kiniisaddii iskudhafka ahayd, haddana tii madawga, haddana tii caddaanka. Nafi igu may jirin. Ugu yaraan sagaalkii habeennimo ayay ahayd. Maalmahaa, oo waxaas oo qulqulatooyin ahi socdaan, kuu may fiicnayn in aad xilligaa bannaanka ku gaadhaa. Waxaannu taagtaagnayn aagga Jellicoe Avenue iyo waddada Oxford, oo ah badhtamaha xaafadaha hodanka ah ee caddaanka Joohaanisbeeg. Wax bascaasi ahi muu marayn. Jidadkuna way wada haawanayeen.

Waxaan si uun u rabey in aan hooyo ku jeesto oo ku dhaho: "Saw ma aragtid? Ilaahay wuxuu rabey in aynu gurigeenna iska joogno." Balse hal mar qudh ah oo aan wejigeeda

eegay ayaa igaga filnaaday in aan afkayga haysto. Way jireen xilliyo aan hooyaday ku soo hadalcelin jiray—balse hadda oo kale ma aha.

Bascaasi baannu sugnay, oo sugnay. Xilligii midabtakoorka, xukuumaddu madawga u may samayn wax nidaam gaadiid ah. Haddana caddaanku waxay noogu baahnaayeen in aannu isa soo xaadirinno si aannu dhulka ugu xaaqno oo suuliyada ugu maydhno. Maaddaama baahidu tahay hooyada hal-abuurka, madawgu waxay ikhtiraacdeen nidaam gaadiid oo u gaar ah, oo ah shebakad basas ah oo aan rasmi ahayn oo ay maamulaan ururro gaar loo leeyahay oo gebi ahaanba ka baxsan xayndaabka sharciga. Mar haddiiba aan nidaamka bascaasiyada cidi jaangoyn, wuxuu iska ahaa denbi abaabulan. Kooxo kala duwan ayaa gacanta ku hayey marinnada kala duwan, wayna isku qabsan jireenba gacankuhaynta. Waxa jiray laaluush iyo qudhunqarsi kale oo badan oo is dhex socda, gacankahadal baahsan, iyo lacago ilaalo ah oo fooqalcaqli ah oo loo bixiyo si gacankahadallada looga hortago. Waxa keli ah ee ay tahay in aad iska ilaalisaa waa in aad ku xaddo marinka qolo aad is haysaan. Wadayaasha ku xadana waaba la dili jiray. Maaddaama aan la nidaamin, bascaasiyada badiyaa la isku ma hallayn jirin. Markay soo maraan, way soo mareen. Marka aanay soo marinna, may soo marin.

Intii aan liqdaarnaa barxadda Rosebank Union, sarajooggaan ku gam'i gaadhay. Wax bascaasi ahina ma soo muuqdo. Aakhirkii, hooyo waxay tidhi: "Ina wadi aynu baabuur lifti wayddiisannee." Waannu soconnay, oo soconnay. Markii aannu jarnay masaafo u eg in aanay carri lahayn, ayuu gaadhi soo socday noo joogsaday. Dirawalkii baa noo fidiyay lifti, dabadeed waannu isku hubsannay. Annagoon toban tallaabana socon, ayuu bascaasi maqiiqani gaadhigii aannu saarnayn ku gooyay.

Dirawal Suluu ah ayaa la soo degay *iwisa*, oo ah hub dhaqameed Suluugu leeyihiin oo qaro weyn—waa iska faash dagaal oo kale. Waxay u adeegsadaan in ay dadka dhakada kaga bashaaqiyaan. Nin kale, oo kirishboygiisii ahaa, ayaa dhankii rakaabka isna ka soo degay. Inta ay gaadhigii aannu saarnayn xagga dirawalka abbaareen, ayay wadihii kaladhka ku dhegeen oo bannaanka uga soo dhufteen oo faashashkoodii wejiga ka saareen. "Maxaa kuu geeyay macaamiishayada? Maxaad dadka u sii qaadaysaa?"

Waxaan u eegay sidii oo ay ninka ajashiisa jarayaan. Waan ogsoonaa in taasi marmar dhacdo. Hooyo ayaa hadal ku darsatay: "Waar i dhegaysta. Ninku annaguu na caawinayey. Iskaga taga. Idinka ayaannu idin raacaynaa. Cid na qaadda uun baa noo daran e." Dabadeedna gaadhigii waannu iskaga soo degnay, oo bascaasigii ayaannu u wareegnay.

Wax rakaab ahba annaga oo keli ah ayaa baska saarnayn. Marka laga yimaaddo dirawallada bascaasiga Koonfur Afriki in ay budhcad yihiin, waxa u dheer in ay ku afxumaadaan oo ku adyadoodaan rakaabka. Dirawalkani si gaar ah ayuuba cadho jiq u yahay. Intii aannu sii soconnay, wuxuu hooyaday u galay muxaadaro ku saabsan sababta

ay ugu khaldan tahay in ay nin aan odaygeedii ahayn gaadhi kula keliyaysato. Hooyaday la may baran muxaadarada ragga qalaad. Waxaanay u sheegtay in uu danihiisa ku foofo. Markii uu arkay in ay af Xawsa ku hadlayso, ayuu ka sii daray. Waxyaabaha dumarka Suluuga iyo Xawsaha laga kala aaminsanaa waxay caqliga ugu xasileen isla sida ay u xasileen waxyaabaha ragga laga aaminsanaa. Dumarka Suluuga waxa loo haystay in ay masuul yihiin oo ay dhaqan suubban yihiin. Halka haweenka Xawsuhu ay yihiin wax dhintay oo bilaa iimaan ah. Hooyaday, oo ka soo jeedda reerka ay dirawalkan is hayeen, waa tan iyadoo wadata labo wiil oo midkood yahay iskadhal, keligeedna socota. Dhillo keli ah ma aha e, waa dhillo caddaanka la seexata. "Haa, ileen reer Xawsa ayaad tahay," ayuu yidhi. "Dee waa halkaan kaa garan la'aa, ee aad baabuurta ajinnabiga gosha uga gelaysey. Akhas caleeg!"

Hooyaday waxay ku soo celcelinaysey in uu hadalka ka joojiyo, isaguna wuu u tirinayey, oo uu kursiga hore kaga soo qaylinayey, oo faraha ku soo fiiqfiiqayey. Marba marka ka danbaysana handadaadda ayuu sii wadey, ilaa uu ugu danbayntii yidhi: "dumarkiinaa Xawsaha ah dhibtiinnu waa taa. Waxaad tihiin qabxado—caawana abaalkaaga ayaad helaysaa."

Xawaaruhuu kordhiyay. Si xawli ah ayuu u kaxeeyay, oo mar keli ah muu dhimayn, marmar uu isgoysyada iska eegayey in lagu soo jiro mooyee, dabadeedna wuu sii karaarqaadanayey. Daqiiqaddaa dhimashadu kaabiga ayay noo saarnayd. Hooyaday waa la kufsan karayey. Waa na la dili karayey. Waxaas oo dhami way dhici kareen. Halista aannu wajahayno aad u ma fahansanayn markaa; oo daal baan kax ahaa, waxaanan doonayey in aan seexdo uun. Waxaana intaa dheerayd in hooyo is dejinaysey. May kardhanayn, anigana kardhasho ii ma oollin. Waxay isku deyaysay in ay u caqliceliso:

"Waannu ka xunnahay haddii aannu kaa xanaajinnay, mudane. Halkanba waad na dhigi kartaa…"
"May."
"Hadda dhib ma laha. Waannu lugayn karnaa…"
"May."

Wuxuu dhuftay waddada Oxford oo bannaan, baabuur kalana aanay marayn. Waxaan fadhiyay kursiga ugu xiga albaabka bascaasiga. Hooyana way i ag fadhiday, oo dhabta ayay ku haysey Andrew oo mujo ah. Inta ay baaladaymootay, ayay dhegta ii saartay: "Marka uu isgoyska labaad marayo ee uu xawaaraha qaboojiyo, albaabka ayaan furayaa oo waynu boodaynaa."

Hadalkaa ay lahayd erayna hagaag uga ma maqlayn, waayo daqiiqaddaa waan lulaysnaa. Markii aannu ishaarada soo gaadhnay, ayuu dirawalkii dhimay xawaaraha si uu u hubiyo hareeraha in lagu soo jiro. Hooyo inta ay i weydaaratay oo albaabkii riixday

ayay iga gacanbuuxsatay oo intii karaankeeda ahayd i tuuryaysay. Ka dibna inta ay Andrew soo qabsatay ayay isku duubtay ayay iska kay soo daba tuurtay.

Waxaas dhacayay oo dhan maan rumaysan ilaa aan xanuunka dareemay. *Bam!* Dirrida ayaan ka soo go'ay. Hooyana agtayda ayay ku soo dhacday, oo sidii kubbadda ayaannu is giraangirinnay. Markaas ayaan saani u baraarugay. Waxa isugu kay xigtay anigoo badh hurday iyo aniga oo leh *waar maxaa dhacay!* Aakhirkii waan istaagay aniga oo isku dhex daadsan. Hareeraha ayaan eegay, saa waa hooyaday oo lugaheeda ku taagan. Way soo jeesatay, oo intay i soo eegtay af labadii ku yeedhay: "*CARAR*!"

Dabadeed waan orday, oo ay orodday. Cidina aniga iyo hooyaday lug nagu ma gaadhi karto.

Waa xaalad ay adag tahay in la sharraxo, haddana waan ogaa waxa ay tahay in aan sameeyaa. Wax nagu abuuran ayay ahayd, oo aannu ka barannay duni rabshaddu ina daanweyne tahay oo belaayadu mar kasta dhici karto. Xaafadaha marka boolisku soo weeraro isagoo oodihiisa wata, waxaan aqaanay micnaha ay leedahay in lagu dhaho: *Carar oo baxso! Carar oo dhuumo!* Waxaan taa bartay aniga oo shan jir ah. Haddii aan nolol kale ku soo kori lahaa, in bascaasi socda la iga tuuraa waxay igu noqon lahayd uqaadanwaa. Intaan sidii qof dhaadhaan ah u istaago ayaan iska odhan lahaa: "Maxaa dhacaya, Hooyo? Luguhu maxay ii kaarayaan?" Balse waxaas oo dhami may jirin iminka. Hooyo waxay i tidhi "carar", ka dibna waan cararay. Sida deeradu libaaxa uga cararto ayaan u cararay.

Raggii intay bascaasigii istaajiyeen ayay ka soo degeen oo isku dayeen in ay na baacsadaan, balse u may suuragelin in ay na hawaystaan. Uuraannu ku xidhnay. Waxaan filayaa in ay yaabbanaayeen. Weli waan xasuustaa in aan gadaal jalleecay oo arkay iyagoo is dhiibay oo uu wejiyadooda ka muuqdo shaamareer: *Waar maxaa dhacay? Yaa malaysan karayey in haweenay labo carruur ah sidataa sidan u ordi karto?* May ogayn in ciddan ay soo afaaraysteen ay tahay horseedkii maalinta ciyaaraha ee iskuulka Maryvale College. Waannu orodnay, oo orodnay, ilaa aannu ka gaadhnay kaalin shiidaal oo hadh iyo habeen furan, dabadeed aannu halkaa booliska ka wacnay. Balse xilligan raggii beri hore ayay iska tageen.

Ilaa hadda ma ogi sababta waxan oo dhami u dhaceen; dabayl baa cagaha la ii geliyay. Markii aannu istaagnay ayaan dareemay xanuunka i hayaa intuu le'eg yahay. Hoos baan eegay, saa diirkii cagtaydu wuu qaadmay. Waan xoodhxoodhay oo gebigabayguba dhiigayey. Sidaas oo kale ayay hooyana ahayd. Haddana, iyaba waa yaab e, walaalkaygii yaraa wuu bedqabay. Hooyo ayaa siduu u dhamaa isku duuduubtay, oo wuu ka soo samatabaxay. Aniga oo anfariirsan ayaan ku jeestay oo ku idhi:

"Waxan iminka dhacayey muxuu ahaa? Maxaa ina orodsiinayay?"
" Maxaad ka waddaa 'Maxaa ina orodsiinayay'? Raggu in ay ina dilaan bay rabeen e."

"Dee haaye waxaas oo dhan ii maad sheegin. Gaadhigii uun baad iga soo tuurtay!"
"Waar waan kuu sheegay. Maxaad u boodi weyday?"
"Boodi weyday? Waan hurday!"
"Markaa waxaad iga filaysey in aan kaaga imaaddo si ay kuu dilaan?"
"Ugu yaraan dee intaanay i dilin way i toosin lahaayeen!"

Sidaas ayaannu isaga daba wareegnay. Waan dawakhsanaa oo waxaan ka cadhaysnaa in baabuur socda la iga tuuray, ilaa aan ka xaqiiqsaday waxa dhacay. Hooyaday way i badbaadisay.

Markii aannu neef qaadannay ee sugayney inta boolisku noo imanayo si ay guriga noo geeyaan, ayay hooyo tidhi: "Ugu yaraan waynu bedqabnaa, waa Alle mahaddii e."

Balse sagaal jir baan ahaa oo wax intaa dhaafsan waan aqaanay. Markanna maan aamusi karayn.

"Maya, Hooyo! Tani *ma aha* mahad Alle! Waxay ahayd in aad Alle maqashid markii uu si kasta inoogu sheegayey in aynu gurigeenna iska joogno markii baabuurku xumaaday, waayo waxa cad in Shayddaan uu innagu siray in aynu caawa soo baxno."
"Maya, Trevor! Waxaasi waa shuqul Shayddaan. Tani waxay qayb ka ahayd qorshaha Eebbe, mar haddii uu halkan innala damcayna qorshuu ka lahaa…"

Sidaas baannu isaga daba wareegnay, oo uga doodaynay doonista Eebbe. Markii danbana waxaan ku idhi: "Eeg, Hooyo! Waan ogahay in aad Ciise Masiix jeceshahay, balse toddobaadka danbe waxaad inoo wayddiisaa in uu gurigeenna inoogu yimaaddo. Waayo waxa caawa dhacay, sida runta ah, may ahayn wax lagu maadsado."

Inta ay aad u dhoolacaddaysay ayay qosol ka wadhay. Anna waan qoslay. Waannu is istaagnay, annaga oo ah wiil yar iyo hooyadii, oo cududahayagii iyo cagahayagiiba dhiig iyo dhasi dabooleen, isagoo xanuunku wada hayana ka wada ag qoslaya iftiinka kaalinta shiidaalka ee waddada dhinaceeda ku taal, xilli habeenbadh ah.